Siyaasadda KFA- Habdhaqanka Dadweynaha ee ku aadan Alaabta Dugsigga

Isticmaalka alaabta dadka ama alaabta degmada dugsiga ujeedo kasta oo loo isticmaalo waa kuwo aan halkaan ku jirin:

1. Habdhaqan kasta oo loogu talagalay in lagu carqaladeeyo, qaso ama soo dhex galo waxbarida, baarista,adeegga, maamulida ama hawlaha aadaabta, ama hawl kasta oo laga maalgeliyo ama laga oggolaado Guddiga xagiisa.

2. Ku xadgudub jirka ah ama hanjabaad dhib ah oo loo gaysto qof kasta ama alaabta laga leeyahay degmada dugsiga ama alaab la maamulo ama uu degmada dugsigu ay maalgeliso ama hawlo la maareeyo.

3. Hanjabaad burbur ah ama burburinta hantida ay iska leedahay degmada dugsiga ayada oo aan la eegayn booska ama xubinka bulshada ama qof soo booqday dugsiga marka ay hanitidaas oo kale la dhigo dhismooyinka degmada dugsiga laga xukumo.

4. Gelid xoog ah ama aan oggolaansho loo haysan loona galo qalabka shaqada dugsiga, ay ku jirto dhammaan dhismaha iyo dhulka ku wareegsan.

5. Isticmaal aan sharci ahayn, lahaansho, qaybinta ama iibinta daroogooyin iyo waxyaabaha kale ee la ilaaliyo, aalkolo iyo alaabta kale ee aan sharciga ahayn ee ay iska leedahay degmada dugsiga, hawlaha uu dugsiga maalgeliyo, midkasta oo ka mid ah basaska ardayda qaada ama lacagta gudaha ku jirta 1,000 ee dhinaca dhulka dugsiga ah. (Dadka la ogsoonyahay in ay cabsanyihiin looma oggolaanayo in ay dhismaha dugsiga u galaan ama beerihiisa.)

6. Lahaansho aan sharci ahayn oo uu qofku leeyahay hub dad dil ah, sida lagu qeexay qaanuunka dowlada, dhulka dugsiga ama dhismooyinka dugsiga aan ka ahayn haddii qofku ka mid yahay dadka qaanuunka dowladu u oggolaaday lahaanshaha hub dilaa ah ay ku jirto:

a. Wuxuu sharci oggolaansho ah u haystaa in uu sido ama lahaado hub dad dil ah.

b. Wuxuu matalayaa mudaaharaad dadweyne oo oggolaansho haysta dugsiga loo samaynayo ama dabaqad nidaamsan.

c. Wuxuu qabanayaa shaqo degmada dugsiga ku saabsan taasi oo u baahan isticmaalka hub dad dil ah.

d. Wuxuu ka qaybqaadanayaa hawl manhajka ka baxsan taasi oo uu u haysto oggolaansho ama koox ku lug leh isticmaalka qori.

e. Wuxuu leeyahay boos uu ku lahaan karo hub si uu ugu isticmaalo barnaamij waxbarasho oo loo oggolaaday kaasi oo ku jira laakiin aan ku xaddidnayn kooras kasta oo loo qorsheeyay hagaajinta iyo samaynta hubka.

f. Asagu waa nin booliis ah oo waajibkiisa gudanaya.

7. Afxumo ama luuqad hadal aflagaado ah.

8. Hab dhaqan kasta oo ka abuurmaya jebinta isku tag kasta, qaanuun dowlad ama magaalo ama siyaasad sidii la rabay loo bilaabey iyo/ama xeerka Guddiga.

9. Ku war wareegid,(in la istaago dhaqdhaqaaq la'aan, in lagu daaho, dib u dhac, ama iska war wareegid, ama ku nagaan, daa'imid, ama ku daahid meel dadweyne).

Xubin kasta oo katirsan dadweynaha guud kaasi oo looga arka maamulaha ama kuxigeenkiisa xagooda in uu ku xadgudbay siyaasaddan waxaa lagu amrayaa in uu katago hantida degmada dugsiga.

a.Xadadka waalidiinta iyo mas’uulka sharciga ah ee ka ahaaday dhulka dugsiga.

Guddiga Waxbarashadu wuxuu ku guubaabinayaa kuna tiirsanaanayaa balan waalidnimo oo buuxda si xoog ahna uga kooban guulaha uu gaaro ardaygu. Intaas waxaa sii-dheer, Guddigu wuxuu adkaynayaa oo uu ogsoonyahay dhammaan xuquuqaha waalidnimo ay ku difaaci uguna doodi karaan carruurtooda, ay ku raadin karaan caddayn kuna muujin karaan ra'iyigooda ku saabsan arrimaha manhajka iyo xukumida dugsiga, sidoo kale in ay raadiyaan xalal ammaanka ku saabsan ama mawduucyo kale oo ku lugta leh xuquuqda cunugooda uu ku heli karo waxbarasho dadweyne oo tayo leh, ayada oo aan jirin cabsi laga qabo aargoosi qaab kasta oo ay noqoto. Sikastaba, waa mas’uuliyada shaqaaluhu in ay damaana qaadaan bixinta jawi iskuul oo ammaan iyo nabad gelyo ah kaasi oo wax lagu baran karo, sidaas daraadeedna u baahan shaqada dugsiyada in ay noqoto mid ka maran wax kasta oo la xariira habdhaqanka loogu talagalay in uu carqalad sameeyo, wax qaso, ama soo dhex galo wax barida, wax baarista, adeegga, hawlaha maamulka ama aadaabta ama hawl kasta oo laga maalgeliyo ama laga oggolaado Guddiga xagiisa. Isla sidaas, ayaa waaladiinta ayaguna looga baahanyahay in ay ku dabakhaan nafsadooda xeerarka dugsiga u yaala marka loo eego qodobada kor lagu soo xadiday.

Dhacdada midaasi oo waalidku/mas’uulka sharciga ah lagu helo asaga oo ku xadgudbaya siyaasaddan habdhaqanka ku aadan alaabta dugsiga, asaga/ayada waxaa laga mamnuucayaa waxyaabaha lacag la'aanta ah ee sida caadiga ah loo siiyo waalidiinta iyo mas’uuliyiinyta sharciga ah si loo damaana qaado ammaanka iyo nidaam socodka dugsiga. Dhacdadaasi, xariir qoran ayaa la siin doonaa waalidka ama mas’uulka si loola socodsiiyo waxyaabaha laga mamnuucay ee dugsiga dhismihiisa ku saabsan, habkan soo socda ayayna u dhici doontaa:

- Warqadu waxay ka koobnaan doontaa tixraac qaybta siyaasadda Guddiga ee lagu xadgudbay ah.
- Warqadu waxay ka koobnaan doontaa xisaab kooban oo cad oo run ah, kuna saabsan dhacdada.
- Warqadu waxay xadidi doontaa qaab wakhtiyeedka xaddaynta dhismaha dugsiga, aan lagu darin dhamamadka sannad dugsiyeedka hadda ah ee aan lahayn xadgudub qaanuun jebin ah.
- Warqadu waxay ka koobnaan doontaa tilmaamooyin waalidka loogu talagalay ee ku aadan codsasho go'aan ah ama tixraac habka codsiga waxaa lagu cadeeyay siyaasaddan.
- Ammaanka Degmada iyo Ammaanka shaqaalaha kale, ee ku aadan bixinta xariiryadan oo kale, waxay si cad u sheegi doonaan aqoonsigooda shakhsiga ah waxayna waalidka/waliga uga tagi doonaan kaarar ganacsi si uu tixraac ugu noqdo.

b. Hawsha codsiga waalidka/mas'uulka ee xadidaada ku saabsan dugsiga dhulkiisa.

Si kasta oo ay duruufta noqoto marna lama oggola in warqadaha xadidaada dugsiga lagu isticmaalo meelaha isku muranyada lagu xaliyo ama looga aarsado waalidka/mas'uulka sharciga ah. Hogaamiyayaalka dugsiga waxay si xoogan ugu boorinayaan in lala tashto horjoogahooda tooska ah, Xafiiska Balanta Waalidka, Ammaanka iyo Nabbada, iyo/ ama qayb kale oo macquul ah kuna habboon DPS. Kahor inta aan la soo saarin warqada xadidaada, aana in baddan la raadin xogag dhexdhexaadin ah, sida codsashada dhexdhexaad laga codsado Xafiiska Balanta Waalidka.

- Marka lahelo warqada xadidaada, 30 maalin gudahooda, waalidka/mas'uulka sharciga ah waxay qori karaan warqad codsasho ah una dirayaan Maareeyaha, warqaddan oo ka kooban xaqiiqda xaaladu sida ay u fahmeen waalidka/mas'uulka sharciga ah.
- Si loo caawiyo waalidka/mas'uulka kuwaasi oo u baahan kaalmayn, Xafiiska ee Balanta Waalidka wuxuu yahay mid diyaar u ah garab ku siinta warqadda qoraalkeeda iyo/ama tarjumaada hadalka qoran ee laga saxiixay waalidka xagiisa/waliga si loogu dhiibo Maareeyaha.
- Maareeyaha ayaa soo saari doona go'aan lagula xariirayo waalidka/mas'uulka sharciga ah 30 maalmood gudahooda, ay la jirto mudo wakhti aan gudbayn tan warqada asalka ee xadidaada ah.

Xafiiska Balanta Waalidka wuxuu sii wadi doonaa diiwan gelinta warqad kasta oo xadidaad ah ee la soo saaro iyo, haddii la codsado, in uu macluumaad siiyo Guddiga Waxbarashada.

La ansixiyay 17 Maajo, 1965

Qaybaha waxaa dib u hubin lagu sameeyay Sibteembar 1, 1970, 20 Agoosto, 1976 iyo 1 Febraayo, 1983

La muraajaceeyay Abriil 1994

La muraajaceeyay 20 Juun, 2002

La muraajaceeyay 30 Juun, 2011

TIXRAACA SHARCIGGA .: C.R.S. 18-1-901 (3)(e)
C.R.S. 18-9-106
C.R.S. 18-9-108 si toos ah 110
C.R.S. 18-9-117
C.R.S. 18-12-105.5
C.R.S. 18-18-105
C.R.S. 18-18-407 (2)
Lambarka sirta ee DowladDa hoose, Magaalada iyo Deegaanka Denver, Maqaal 824.2,tixraaca la muraajaceeyay , Qaanuun 346, Taxan1968

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: GBEB, Habdhaqanka Shaqaalaha
GBEC, Meelaha-shaqada Aan-Daroogada-lahayn (Isticmaalka Aalkolada /Xadgudub Daroogo ah ee loo gaysto Xubnaha Shaqaalaha)

JICH, Ardayda Isticmaasha Daroogada iyo Alkolada

JICI, Hubka Dugsiga yaala

KI, Dadka soo booqda Dugsiga